

# DUGSIGA HOOSE RILEY

## WARQAD KA SOCOTA AGAASIMAHA



**Diseembar 14, 2016**

**Fikradda todobaadkaan: Labbiska**

Gacaliyeyaal Qoysaska,

Sida ay u badan tahay in aad horay ula socotay, Dugsiga Riley waxaa u dagan siyaasad ku saabsan labbiska. Si dugsiga u yeesho siyaasadda labbiska, waalidiinta waa in ay codkooda ka dhiibtan. Tani waxaa lagu qabtay halkaan, Dugsiga Riley, sannooyin badan ka hor.

Siyaasadda labbiska waxay leedahay ardayda waxay soo qaadan karaan baluug culus, baluug qafiif ah, caddaan, madow, iyo maariin. Waa la ogol yahay Levis. Lama ogola sumadaha, marka laga reebo sumadda Riley. Sidoo kale, shaararka waa in ay ka madax banaan yahiiin naqshad. Marmar, ardayda waxay hoosta ka qaateen shaarar si ay u kululeyaan gacmahooda kore. Tani waa fikrad wanaagsan, hase ahatee waxay sidaas tahay oo keliya haddii shaarka hoose raaco siyaasadda labbiska.

Maalintii, haddii ardayda la kulmaan qabow, fadlan aan ogaano, kaddibna waxaan wax ka qaban karnaa sida loo toosiyo heerkulka. Hase ahatee, haddii ay doonaan in ay gudaha fasalka ku qaataan jaako, daboolka madaxa, ama funaanad culus, waa in ay yahiiin kuwo waafaqsan midabada iyo sharciyada fasalka. Haddii aysan waafaqsaneyn, caruurta waxaa laga codsan doonaa in ay jaakada iyo funaanadda culus ku soo dhaafaan lokarada ama in ay suraan suranka.

Waxaa dibadda lagu soo bandhigay tusaalooyin ku saabsan labbiska iyo kuwo aan tusaalooyin ahayn. Fadlan kaalay oo arag.

Haddii ay kugu adag tahay in aad heshid labbis, la xariir Mrs. Mendoza oo ka tirsan Xarunta Ilaha Qoyska (Family Resource Center) (qolka 201). Waxaan haynaa labbis si jilicsan loo isticmaalay iyo cabbiro badan oo kala duwan oo laguugu soo dhaweynaayo.

**Shirkii la qabtay bishii Nofembar, Guddiga Bulshada Dugsiga (School Community Council) (SCC) wuxuu dhiibtay codkiisa, wuxuuna ku talliyay in wax lagu daro siyaasadda labbiska. Waxaa lagu daarri doonaa midabka dambasta. Waxaa lagu dabaqaa isla sharciyada ku saabsan midabka dambasta - waa in uu adag yahay, in uu uusan lahayn naqshad iyo waa in uusan lahayn sumad.**

***Si isbaddalkaan loogu sameeyo siyaasadda labbiska, waxaan u baahanahay in aan fikrad badan ka helno waalidka ilaa inta suurto galka ah. Marka waxaan kaa codsaneynaa in aad qeybta hoose warqadaan ku soo celisid dugsiga ugu dambayn Janaayo 17, 2017. Haddii aad dooneysid in aad qof ahaan la qeybsatid fikradahaada, fadlan kaalay shirka waalidka maalinta Qamiista, bisha Janaayo 19, marka ay tahay 5:30 pm laguna qaban doono qolka shirarka Riley.***

Waxaan u baahanahay codkaada si SCC u gaarto go'aan kama dambays ah oo ku saabsan labbiska marka la yimaado shirk SCC ee la qaban doono Janaayo 30.

Waad ku mahadsan tahay tixgelinta aad siisay siyaasadda labbiska iminka jirta iyo fikradda aad ku biirisay isbaddalada la soo jeediyay.

Mahadsanid,  
James Martin, Principal (Agaasimaha)

\*\*\*\*\*

**DUGSIGA KU SOO CELI QEYBTAAN UGU DAMBAYN JANAAYO 17, 2017!**

Magaca waalidka \_\_\_\_\_

Cunugga (Caruurta) \_\_\_\_\_

Fadlan calaamee hal:

\_\_\_\_\_ HAA, waxaan jeclahay in midabka dambasta lagu darro siyaasadda labbiska.

\_\_\_\_\_ MAYA, waxaan jeclahay in siyaasadda labbiska ahaato sideeda.

**dusha. Mahadsanid!**

***Waxaad faalada ku qortaa***